

Somaliland Shipping Agents' Licences (Re-organisation) Law 1995

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Golaha Wakiiladda

1/3.

Hargeysa: 27/11/95

XEER LAMBER:- 21 EE TARIIKH 27KII NOOFAMBER 1995KA

-Dib u habayn Liisanka Wakiilnimadda Gaadiidka Badda-

GOLAHA WAKIILADDA SOMALILAND

MARKUU DARSEY - Soo jeedinta Madaxweynaha & iyo Golaha Wasiirada

MARKUU KA DOODEY - Golaha Wakiiladdu

MARKUU DIB U HABAYEY - Qodobadda Xeerka

MARKUU ARKAY - Qodobka Ilaad xubinta (T) Farqadda Iaad ee Axdii-Qarameedka

Wuxuu ansixiyey dib u habayn ka dib xeerkan.

SHURUUDAHA OGOLAANSIHA LIISANKA
-WAKIILNIMADDA GADIIDKA BADDA MARKA B AMA-

D O O N

Waa inuu la yimaadaa qof kastaa ama shirkadda danaynaysa yooxadda Wakiilnimo ee Gaadiidka Badda shuruudaha hoos ku qoran.

QODOBKA IAAD

Waa inuu arji u soo qortaa Wasaaradda Ganaasigga iyo Wasaaradda

QODOBKA 2AAD

Waa inuu la yimaadaa caddeynta :-

B- Wadaninimo Somaliland ah (citizen ship)

T- Waa inuu la yimaadaa shirkad qaab dhismeedkeedu u dhan yahay.

QODOBKA 3AAD

Waa inuu la yimaadaa caddeyn ah khibrad aqooneed ee Xeerarka iyo shaqooyinka Maraakiibta iyo adeegyada loo qabto Gaadiidka Badda, ama uu leeyahay shaqaale shuruudaa leh.-

QODOBKA 4AAD

Waa inuu la yimaadaa caddeyntiisa Maxkamad horteed inuu leeyahay hanti ma guuraa-n ah ugu yaraan \$- 30.000/= oo ah doolar maraykan.

B- Dhismayaal (T) dhul bannaan ama (J) dammaanad u dhiganta USD-30.000 oo doolar maraykan, waraaqaha hantida ma guurtaanka ah ee kor ku xusan ama Lavagta ku xusan waa in dammaanad ahaan loo dhigaa Banka Somaliland.-

QODOBKA 5AAD

Waa inuu la yimaadaa caddaynta ay ka taallo Bankiga Somaliland laag dhigto ah (Deposit) oo dhan Sh. Sl. 5.000.000/= (shan milyan oo shilinka Soomaliland ah.-

QODOBKA 6AAD

Waa inuu la yimaadaa cadeynta in aanu lahayn adeyn taagan oo Maxkamadeed iyo xukun Maxkamadeed oo ah khiyaamo garan :-

QODOBKA 7AAD

Waa inuu aqoon u leeyahay ama shaqaale aqoon u leh leeyahay Nadaafadda guud (General Hygien) una hoggaansamaa xeerarka Maamulka ee Deegaanka Bad iyo Berriba.-

QODOBKA 8AAD

Waa inuu la yimaadaa in aan lagu lahayn cashuur Dawladeed.

QODOBKA 9AAD

Waa inuu la yimaadaa oid la yaqaan oo ku damiinta hantidiisa oo haddii hantidiidaas uu sheegtay ama isagaba la waayo loo baabo.-

QODOBKA 10AAD

Waa inuu lahaadaa xafiis dhismihiisu dhamays tiran yahay (Established-Office) lehna shuruudaha xafiis leeyahay sida (Barcode- Telephone iwm) isla markaana waa inay wanaagsanaato Nadaafadiisa guud (General Hygien).

QODOBKA 11AAD

Mudada oggolaanshaha Liisanku ku xalaal yahay waa hal Sanno.

QODOBKA 12AAD

Qiimaha oggolaanshe Liisanku waa USD 200& Doolar maraykan iyo cusbooneysiinta oo ah USD 100& Doolar maraykan.-

QODOBKA 13AAD

Qofka doonaya ruqsada Wakiilnimada Gaadiidka Badda waa inuu ahaaddo qof masuuliyada qaadi kara.

QODOBKA 14AAD

Hantida iyo bixinta Liisamadda waxaa u xil saaran Gudigaas oo hawlaha heedu tahay:-

- 1.- Dhameys-tirka shuruudaha laga rabo,
- 2.- Aqoonta qofka (Verbal Exam),
- 3.- Hubinta wixii dokumiinti ah,
- 4.- Hubin gofeed.

QODOBKA 15AAD

DAMBIYADA LAGAGLA QAADI KARO,
WAKIILKA RUQSADDA WAKIILNIMADA. -

Qofku wuxuu ku waayi karaa ruqsaddii wakiilnimo ee hore loo siiyey arri-mahan:-

- 1- Khiyaamo garan,
- 2- Khiyaamo Cashuureed,
- 3- Fallisaad.

QODOBKA I6AAD

DAMAAN.D. QOFKA AMA SHIRKADDA GAADIIDKA

Qofka ama shirkadda leh Madidda Badda, waa in uu la yimaaddaa shuruudaha:-

- 1- Diiwaan gelin Gaadiidka uu leeyahay, ayadoo ay la socoto Nuqullo rasmi ah oo caddaynay waddanka uu ka diiwaan gashan yahay Gaadiidka.-
- 2- Qadiyanta ash-khashta qofka ama shirkadda leh Gaadiidka iyo jinsiyaddiisa:- Jinsiyadooda/ Jinsiyadahooda/ --
- 3- Damaanad lacag ah oo la dhigo Baanka Somaliland, waxaana qeexi doona dammaanadaha Wasaaradda Ganacsigga.-
- 4- Qadiyeyn Nuqullo rasmi ah hanti Maguuraanka ah ama Guurtada ah ee uu ku leeyahay ama ku leeyihiin goob caan ah.
- 5- Banhiisa/ Bankooda ama Banka ay la macaamilaan iyo xisaabta uga furan Baanka.-

EELAH MAHAD LEH

A.D. [Signature]
 (AXMED CABDI MAXAMUUD) XAABSALE.
 =GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA S/LAND=


[Signature]
 (Cabdulnan Cabdullah) XAABSALE
 =GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA S/LAND=
 S/LAND/